

Tusmada Tixraaca Talaalka COVID-19 ee loogu talagalay dhammaan dadka Difaacooda jirku liito

Dadka difaacooda jirku liito ayaa si gaar ah ugu nugul caabuqyada uu ku jiro COVID-19. *Haddii aad qabto mid kamid ah xaaladaha caafimaad ee soo socda waxaa lagu aqoonsanayaa qof difaaca jirkiisu liito si dhexdhexaad ah illaa xaalad halis ah waxaana ka faa'iideysan kartaa talaalka kuuro seddexaad oo COVID-19 ah. Tani waxaa ku jira dadka:*

- » Qaadanaaya daaweynta kansarka firfircoon ee burooyinka ama kansarrada dhiigga
- » Isku tallaalay xubin kale oona qaadanayo daawooyin si loogu qasbo in la oggoleysiiyo nidaamka difaaca jirka
- » Isku tallaalay jirrid unug qof kale 2 sano udanbeysay ama qaadanayo daawo si loogu qasbo in la oggoleysiiyo nidaamka difaaca jirka
- » Qaba difaaca jirka liita aasaasiga ah ee dhexdhexaad illaa xaalad halis ah (sida xaaladda DiGeorge, xaaladda Wiskott-Aldrich)
- » Qaba caabuq hormarsan ama aan la daaweyn ee HIV
- » Qaadanaya daawo socota oo kuuro sare leh oo ah kuwa yareeya alarjiga ama daawooyinka kale ee laga yaabo inay cadaadiyaan falcelinta difaaca jirka.

Liiskan maha mid koobaaya dhammaan xanuunnada difaaca jirka yareeya, fadlan la hadal dhakhtarkaaga si loo go'aansho haddii kuurooyin dheeraad ah ay faa'iido kuu leeyihiin iyo in kale. Haddii aad tahay qof difaaciisa jirku liito, akhri jaantuska hoose si aad u aragto inta kuuro ee aad u qalanto inaad qaadato si aad u hesho difaca ka dhanka ah COVID-19:

Haddii aad qaadatay...	Kooxda Da'da	Taxaneyaasha Koobaad	Miyaan qaataa qiyaas DHEERAAD AH EE MONOVALENT?	Miyaan qaadan karaa KUURO XOOJIN AH?
Moderna	6 billood ilaa 4 sano jir	Saddex kuuro: Labada kuuro ee ugu horeeya ayaa loo dhexaysiiyaa 21 maalmood; kuurada saddexaad ayaa la qaataa 8 asbuuc kadib.	Ma jirto kuuro dheeraad ah oo talaalka aasaasiga ah wakhtigan.	Maya, kuurada la cusbooneysiiyay ee bivalent looma fasaxin inay qaataan carruurta jira 6 billood ilaa 4 sano ee horey u qaatay guud ahaan kuurooyinka Pfizer waqti xaadirkaan.
	5 sano jir	Labo kuuro oo loo dhexaysiiinaayo 21 maalmood.	Haa, waa inaad qaadataa kuuro dheeraad ah 28 maalmood kadib markaad qaadatay kuuradaada labaad.	Haa, carruurta jira 5 ssano ee qaatay talaalka Pfizer waxay kaliya qaadan karaan kuurada la cusbooneysiiyay ee Pfizer bivalent.
	6+ sano jir	Labo kuuro oo loo dhexaysiiinaayo 21 maalmood.	Haa, waa inaad qaadataa kuuro dheeraad ah 28 maalmood kadib markaad qaadatay kuuradaada labaad.	Haa, kuurada xoojinta ah ee talaalka bivalent Pfizer ama Moderna mRNA ayaa lagu talinayaa 2 billood kadib kuurada ugu danbaysa ee dadka jira 6 sano iyo ka wayn si ay u helaan difaac buuxa. Dadka da'doodu tahay 18 sano iyo kasii weyn aan horay u qaadan kurada xoojinta ah ayaa dooran kara inay qaataan kuurada xoojinta ah ee Novavax 6 billood kadib marka ay dhamaystaan taxaneyaashooda rasmiga ah haddii aysan heli karin ama aysan heli doonin kuurada xoojinta ah ee cusub ee mRNA.
Pfizer	6 billood ilaa 4 sano jir	Labo kuuro oo loo dhexaysiiinaayo 28 maalmood	Haa, waa inaad qaadataa kuuro dheeraad ah 28 maalmood kadib markaad qaadatay kuuradaada labaad.	Haa, carruurta jira 6 billood - 4 sano waa inay qaataan kuurada bivalent ee la cusbooneysiiyay oo ay soo saartay isla shirkadii ay ka qaateen talaalada taxaneyaasha ah ee koowaad.
	5 sano jir	Labo kuuro oo loo dhexaysiiinaayo 28 maalmood	Haa, waa inaad qaadataa kuuro dheeraad ah 28 maalmood kadib markaad qaadatay kuuradaada labaad.	Dadka jira 5 sano iyo kasii wayn waa inay qaataan kuurada xoojinta ah ee bivalent ee la cusbooneysiiyay oo ah Pfizer ama Moderna
	6+ sano jir	Labo kuuro oo loo dhexaysiiinaayo 28 maalmood	Haa, waa inaad qaadataa kuuro dheeraad ah 28 maalmood kadib markaad qaadatay kuuradaada labaad.	Haa, kuurada xoojinta ah ee talaalka bivalent Pfizer ama Moderna mRNA ayaa lagu talinayaa 2 billood kadib kuurada ugu danbaysa ee dadka jira 6 sano jir iyo ka wayn si ay u helaan difaac buuxa. Dadka da'doodu tahay 18 sano iyo kasii weyn aan horay u qaadan kurada xoojinta ah ayaa dooran kara inay qaataan kuurada xoojinta ah ee Novavax 6 billood kadib marka ay dhamaystaan taxaneyaashooda rasmiga ah haddii aysan heli karin ama aysan heli doonin kuurada xoojinta ah ee cusub ee mRNA.
Johnson & Johnson	18+ sano jir	Hal kuuro	Haa, waa inaad qaadataa kuuro dheeraad ah oo talaalka mRNA ah 28 maalmood kadib kuurada 1aad ee talaalka J&J.	Haa, kuurada xoojinta ah ee talaalka bivalent Pfizer ama Moderna mRNA ayaa lagu talinayaa 2 billood kadib kuurada ugu danbaysa si aad u hesho difaac buuxa. Dadka da'doodu tahay 18 sano iyo kasii weyn aan horay u qaadan kurada xoojinta ah ayaa dooran kara inay qaataan kuurada xoojinta ah ee Novavax 6 billood kadib marka ay dhamaystaan taxaneyaashooda rasmiga ah haddii aysan heli karin ama aysan heli doonin kuurada xoojinta ah ee cusub ee mRNA.
Novavax	12+ sano jir	Labo kuuro, oo loo dhexaysiiinaayo 21 maalmood	Ma jirto kuuro dheeraad ah oo talaalka aasaasiga ah wakhtigan.	Haa, kuurada xoojinta ah ee talaalka bivalent Pfizer ama Moderna mRNA ayaa lagu talinayaa 2 billood kadib kuurada ugu danbaysa ee dadka jira 12 sano iyo ka wayn si ay u helaan difaac buuxa. Dadka da'doodu tahay 18 sano iyo kasii weyn aan horay u qaadan kurada xoojinta ah ayaa dooran kara inay qaataan kuurada xoojinta ah ee Novavax 6 billood kadib marka ay dhamaystaan taxaneyaashooda rasmiga ah haddii aysan heli karin ama aysan heli doonin kuurada xoojinta ah ee cusub ee mRNA.

Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo

Waa maxay farqiga u dhexeeya tallaalka garoojada dheeraadka ah iyo garoojada tallaalka xoojiyaha?

Kuurada dheeraadka ah waxaa loogu talagalay qaar kamid ah bukaanada (fiiri jadwalka kore) ee dadka dhameeyay taxanayaasha talaalka ee koowaad laakiin lahayn nidaam difaac oo xoogan.

Kuurada xoojinta ah waxaa loogu talagalay inay kor u qaato ama dib usoo celiso dhowrista iyo/ama nidaamka difaac jirka kadib marka ay qaataan taxanayaasha koowaad ee talaalka muddo kadib.

Waa maxay xanuunnada uur ku jirta ee khatar sare kuu gelinaaya xanuunka daran ee ka dhasha COVID-19?

Dadka da' kasta joogo oo leh xaaladaha hoos ku taxan (Ingiriiska oo kaliya) waxay aad ugu dhow yihiin inay si daran ula xanuunsadaan COVID-19.

Tallaalada COVID-19 (garoojooyinka hore iyo xoojiyeyaasha) iyo tallaabooyinka kale ee ka hortagga COVID-19 waa muhiim, gaar ahaan haddii aad da' wayn tahay ama aad leedahay xaalado caafimaad oo badan ama aad u daran oo ay ku jiraan kuwa liiskan ku jira. Liiskan kuma jiraan dhammaan xaaladaha suurtagalka ah ee kugu meeleyaayo khatar sare oo xanuun daran oo ka timaada COVID-19. Haddii aad qabto xaalad aan halkaan lagu soo darin, kala hadal bixiyaha daryeelka caafimaadkaaga sida ugu wanaagsan ee loo maareeyo xaaladaada oo aad naftaada uga ilaaliso COVID-19.

- » Kansarka
- » Cudurka keliyaha ee muddada-dheer
- » Cudurka beerka ee muddada-dheer
- » Cudurka sambabaha ee muddada-dheer
- » Cudurka dhimirka ama xaaladaha kale ee neerfaha
- » Sonkoroowga (nooca 1 aad ama 2 aad)
- » Xanuunka Down syndrome
- » Xaaladaha wadnaha
- » Caabuqa HIV
- » Xaaladda difaac jirka oo liito (nidaamka difaac oo daciifay)
- » Xaaladaha caafimaadka dhimirka
- » Miisaanka xad dhaafka ah iyo buurnida
- » Xaamilo
- » Xanuunadda ku dhaca unugyada dhiiga cas ama thalassemia
- » Sigaar dhuuqida, hadda ama waa hore
- » Xubin adag ama unugyada tarma ee dhiiga
- » Istoorog ama cudurka maskaxda, kaas oo saameeya socodka dhiigga ee maskaxda
- » Dhibaatooyinka isticmaalka walxaha
- » Qaaxa

Waa maxay difaac xoojiyaha cusub/bivalent?

Kuurada xoojinta ah ee la cusbooneysiisay/bivalent ee COVID-19 waa qaacido talaal kaasoo labadaba kor u qaadaaya difaac ka dhanka ah faraca asalka ah ee korona fayraska sidoo kalena kaa difaacaya faracyada cusub oo qayb ka ah inta badan kiisaska hadda jira. Xoojiyaasha cusub ayaa loogu talagalay inay difaac ugu adag ka bixiyaan fayraska ayna xaliyaan difaac sii yaraanaaya ee talaalka muddo kadib.

Dadka sida dhexdhexaadka ah ama sida daran uu difaac jirkooda u liito miyey u baahan doonaan qoraalka/qorista dhakhtar ama warqad kale si ay u qaataan garoojooyinkan?

Maya, shakhsiyadka ayaa is-aqoonsan kara oona kasoo qaadan kara dhammaan garoojooyinka meel kasta oo tallaalada lagu bixiyo. Tani waxay ka caawin doontaa xaqiijinta in aysan jirin caqabado dheeraad ah oo ka hortaagan helitaanka dadyowgaan. Haddii shakhsiyadka difaac jirkooda uu aadka u liito ay qabaan su'aalo ku saabsan xaaladooda caafimaad ee gaarka ah, waxay kala hadli karaan haddii qaadashada garoojo dheeraad ah ay u habboon tahay ayaga bixiyayaashooda daryeel caafimaadka.

Haddii aan helo talaalka COVID-19, wali ma u baahannahay inaan raaco tallaabooyinka kahortaga?

Haa, xataa haddii aad qaadato talaalka, wali waxaa lagaa rabaa inaad maaskaro ku xiro gudaha xarumaha dadwaynaha. Kahel macluumaad dheeraad ah boggeena [Bogga Su'aalaha Intabadan la isweydiiyo ee Maaskiga Waji Daboolka](#) (oo ku qoran Ingiriis). Waxaan ku talinaynaa inaad si joogto ah u farxalato, aad ka fogaato dadka lix fiid, aadna yarayso kulannada la iskugu imaado.

Tallaalada COVID-19 si fiican ayey ushaqeeyaan, laakiin ma ahan kuwa 100% waxtar uleh. Dadka qaar ayuu kudhacaa COVID-19 xitaa haddii la tallaalay. Soo bixitaanka noocyada cusub ee aadka la isu gudbiyo, waxaa muhiim ah dadka oo dhan inay sameeyaan taxadar sida xirashada maaskaro si loo yareeyo iskugudbinta fayraska.

Miyaad qabtaa su'aalo dheeraad ah? Booqo: doh.wa.gov/covidbooster